

Khayradka, Caawimaada iyo Tixraacyada

Hagahan ayaa la sameeyay si loo caawiyo dadka reer Vermont looguna fududeeyo waxyaabaha muhiimka ah ee la samaynaayo iyo khayraadka lagu heli karo hal goob, ayadoo la diyaarshay lifaaqyada laga heli karo xog faahfaahsan haddii aad u baahato.

Xaaladaha Degdega ah: Wac 9-1-1

Meelaha kale ee laga heli karo caawimo degdega ah:

- **Baahiyaha guud ee degdega ah:** Wac 2-1-1
- **Hoyga Xaalada degdega ah:** Wac 2-1-1 ama waxaad heli kartaa xulashooyinka hoyga koodhka boostada adoo booqanaaya www.redcross.org/local/me-nh-vt/get-help.html ama fariin qoraal ugu dirayga SHELTER iyo koodhka boostadaada (tusaale, "SHELTER 01234") lambarka 4FEMA (43362). Afka Isbaanishka fariin qoraal ah ugu dir erayga REFUGIO iyo koodhkaaga boostada. Qarashaadka loo goosto fariin qoraallada caadiga ah ayaa kaa go'aya. Waxaad sidoo kale soo degsan kartaa [Ablikayshanka Moobilka ee FEMA](#) si aad u hesho hoyada furan.
- **Barnaamijka Caawimaada Guud ee Guriyeynta (Hudheelka ama Albeerkada) ee Wakhtiga Musiibada:** Wac 1-800-775-0506
- **Taageerooyinka Caafimaadka Dhimirka:** Wac 9-8-8
- **Taageerada loogu talo galay dadka naafada ah:** Booqo [naafada, ama helitaanka iyo baahiyaha awoodaha shaqayneed](#)
- **Taageerada loogu talo galay beereleeyda:** ka hel caawimo dhanka farsamada, sharciga ama dhaqaalaha ama la taliyaha ama qof kale oo tababaran; [Home | FarmFirst](#)
- **Xogta lagala xidhiidhayo taageerada Gaarka ah ee FEMA:** Sam Harvey, 202-765-9101 ama Samuel.Harvey@fema.dhs.gov

Talaabooyinka Hore

Maxay tahay inaad samayso, si guud, haddii saamayn kaasoo gaarto daadka:

Liiska kooban ee waxyaabaha la samaynaayo waxaa ka mid ah: hel xog iyo wargelin joogto ah; xaqiiji in gurigaagu badqab qabo; diiwaan geli dhammaan khasaaroyinka adigoo ku daraya sawirada, liisaska, iyo risiidhada; la xiriir shirkadaada caymiska haddii aad caymis leedahay; ka warbixi waxyeelada; si ammaan ah iskaga nadiifi biyaha iyo qashinka; kadibna dhaq guriga. Faahfaahin dheeri ah ayaad hoos ka helayso.

Hel Xogtii ugu danbaysay oo Kasoo Warbixi Khataraha

- **Iska diiwaangeli fariimaha VTAlert** si aad u hesho digniinaha xaaladaha degdega ah, wararka muhiimka ah ee wadooyinka, iyo digniinaha xaalada daran ee cimilada oo toos laguugu soo dirayo. Booqo <https://vem.vermont.gov/vtalert> si aad isku diiwaan geliso.
- **Xogta xirista wadada:** booqo www.newengland511.org
- **Wax arag, oo wax ka dheh:** Haddii aad aragto khattaro soo socda sida godad samaysma, fatahaad ciid ah (landslides), ama meelo godan ama qaybo cusub oo aan la astayn oo ah wadooyin ama dhul daad qaaday oo khatar ah, fadlan u soo sheeg 911.

Kasoo Warbixi Waxyeellada

Ku wargali guryaha iyo ganacsiyada waxyeeladu gaarto [Vermont 211](#) adoo adeegsanaaya lifaaqaan ama adoo wacaya 211. Tan ayaa muhiim u ah lasocoshada waxyeelada gobalka oo dhan ah si loogu wargaliyo FEMA si loo xaqiijiyo in dadka reer Vermont ay helaan maalgelinta federaalka ee soo kabashada. Waxaad warbixinno badan kusoo gudbin kartaa oonlaynka (oo caadiyan ah qaabka ugu dhakhsaha badan), taleefanka, iyo meelaha qaar si toos ah inaad u tagto goobaha loo yaqaan Xarumaha Khayraadka Wakaaladaha Badan.

Xarumaha Khayraadka Wakaaladaha Badan ayaa leh wakiilo ka socda wakaaladaha badan ee gobalka, FEMA, iyo ururada khayriga ah ee bixiya caawimada. Goobahan ayaa dhowrkii maalmoodba u guura deegaano kala duwan. La soco wararka maxalliga ah, wararka baraha bulshada, iyo xogta maxalliga ah si aad u hesho faahfaahin marka laga yaabo inay yimaadaan meel bulshadaada udhow.

Nadiifinta

Xaqiijinta inaad badqabto ayaa ah qaybta ugu muhiimsan nadiifinta. Haddii aad haysato biyo wasaqoobay, shidaal, saliid, ama agab kale oo khatarta ah, fadlan wac 1-800-641-5005 ama 802-828-1138 kahor inta aadan sii wadin.

Caawimaad ku aadan nadiifinta – Waxaa jira mutadawiciin iyo ururo mutadawacnimada ka shaqeeya oo la hawlgaliyay siina wada inay tagaan goobo kala duwan oo ah dhammaan Vermont si ay caawimaad u baxshaan. Nadiifinta ayaa qaadan kara waqti.

- *Hubi in dhismuhu uu badqabo.* Haddii aad u baahan tahay caawimo ah dhanka qiimaynta ammaanka oo ayna ka mid tahay badqabka dhismaha, ciladaha gaaska/propane-ta/shidaalka, ama korontada wac waaxda dab damiska ee deegaankaaga.
- *Diiwaan geli waxyeelada* – ka qaad sawiro badan oo diyaarso liiska waxyaabaha waxyeeladu gaartay ama burburay ayna ku jiraan agabkaaga iyo dhismaha gudhiisa – oo hayso risiidyada.
- *Biyaha qaybta hoose ee guriga* – Haddii ay biyo kuugu jiraan qaybta hoose ee guriga inaad biyahaas meesha ka saarto ayaa ah shaqada koobaad. Waaxda dab damiska ee deegaankaaga ama qandaraasleyaasha maxaliga ah ayaa kaa caawin kara saarista biyaha.
- *Sifaynta agabka biyuhu galeen ama waxyeeloobay (alaabta guriga iyo agabka lamidka ah), qashinka, dhoobada, ama agabka ama nidaamka dhismaha (sida safiitooyinka, qaanadaha, biyo kululeeyaasha, foornooyinka, iwm.)*

Xog ku saabsan nadiifinta qashinka daadka ayaa laga heli karaa halkan:

- [Hagaha nadiifinta qashinka daadka ee CDC](#)
- [Sida Qaab Ammaan ah Biyaha Looga Dhuro Guryaha Qaybta Hoose](#)
- [Ku laabashada Gurigaaga ama Ganacsiga iyo Nadiifinta](#)
- [Hagaha Nadiifinta Guryaha Daadku Gaaray](#)

FEMA ayaa awoodi karta inay kaa caawiso qarashaadka nadiifinta. Sawiro ka qaad oo hayso risiidyada. Arag qaybta kore ee FEMA si aad u hesho xog dheeraad ah.

Nadiifinta qashinka

Qashinka ka dhasha daadka, oo ay ka mid tahay dhoobada, laamaha geedaha, agabka guriga, alaabta shaqsiga ah, iwm. waa in la kala soocaa lana dhigaa meelo ka fog geedaha, biraha korontada iyo dhismeyaasha adkaynaaya in la qaado qashinka, meel u jirta wax ka yar 10 fiit wadada laakiin HA dhigin wadada. Alaabta waa in loo qaybiyaa 6 qaybood – agabka elekteroonigga ah, qalabka waawayn ee korontada, wasaqda khatarta ah, qashinka geedaha, qashinka guriga, iyo qashinka dhismaha. Fadlan raac tilmaanta ka timaada kooxaha dawlada hoose iyo xaaladaha degdega ah.

Xog ku socota saraakiisha maamulka magaalada: Gobalka ayaa leh qandaraasyada maareynta qashinka/uruurinta iyo kormeerka qashinka oo diyaarsan kuwaasoo la hawlgaliyay. Haddii bulshadaadu qabto baahi aan la daboolin kadib marka la wada isticmaalo ama ay yaraadaan khayraadka maxaliga ah, wac SEOC noona sheeg qashinka aad doonayso in la maareeyo. Haddii bulshadu ay si gaar ah u maaraynayso qashinkeeda, waxaa laga doonayaa FEMA inay celiso qarashka si shaqaalaha magaallada ama qandaraasle gaar ah u sameeyo “kormeerka qashinka” – diyaarso qof diiwaangaliya meesha xamuul kasta kasoo baxaayo iyo meesha uu u socdo.

Baahiyaha Muhiimka ah iyo Caawimada Dhaqaalaha

Waxaan u baahan nahay hooy ama guri ku meel gaar ah

Haddii aad u baahan tahay guri ku meel gaar ah sabab la xiriirta daad, hoyo ayaa hadda laga heli karaa goobaha soo socda:

- Barre
- Ludlow
- Northern Vermont University
- Rutland

FEMA ayaa awoodi karta inay kaa caawiso kharashaadkaaga guriga ku meel gaarka ah. [Fadlan arag qaybta FEMA ee hoos tagta Gurmada Waxyeelada iyo Masiibada](#) si aad u hesho taageerooyinka dheeriga ah ee guryaha ku meel gaarka ah.

Waxaan u baahan nahay in la iga caawiyo helitaanka ama bixinta qarashka cuntada

Magaalooyinka, degmooyinka, iyo ururada khayriga ah sida Laanqeyrta Cas ee deegaankaaga ayaa samayn kara goobo quudineed oo dad tiro badan lagu quudinayo. Khayraadka dheeraad ah waxaa ka mid ah:

- **Hel kaydka cuntada:** booqo www.vtfoodbank.org/agency-locator ama wac 800-585-2265
- **Caawimada Guud ee Cuntada (3 Squares):** Ka codso [halkan](#) ama wac 800-479-6151
 - Qoysas hela dakhli dhan 185% ama ka hooseeya oo ah FPL, qoysaska ay u joogaan carruurta qaata [Canshuur Dhaafka Dakhliga lagu Helo VT \(VT Earned Income Tax Credit\)](#).
 - Dadka reer Vermont ee hadda qaata 3 Squares ayna khasaaradu gaartay, fadlan wac 800-479-6151.
- **Qoysaska iyo dhallaanka ilaa 5 sanno jirka ah (WIC):** booqo healthvermont.gov/family/wic ama wac 802-863-7200
 - Waad u qalmi kartaa:
 - Haddii aad dagan tahay Vermont aadna uur leedahay, uu kuu joogo ilmo dhallaan ah oo jira ilaa 6 bilood ama aad naas nuujinayo/xabadka ku quudinayso dhallaan gaaray ilaa 12 bilood
 - Aad buuxiso tilmaamaha dakhliga AMA aad ka qaybgasho 3SquaresVT (SNAP), Medicaid, TANF (Caawimada Ku Meel gaar ah ee Qoysaska Baahan) ama Qoysaska Barnaamijka Caruurta ku Tiirsan.
 - Gunnooyinka cuntada WIC ee Luulyo ee aad wayday sabab la xiriirta daadka awgeed ayaa laguusoo mag dhabi karaa adoo la xiriiraaya xafiiska WIC ee deegaankaaga. Caanaha ilmaha ee Diyaarsan (Ready to Feed formula) ayaa sidoo kale la siin karaa qoysaska ay waxyeeladu gadhay ilaha ay biyaha ka helayaan (magaallada ama ceelka).
- **Dadka reer Vermont ee jira 60 iyo Ka wayn (Meals on Wheels):** Ka wac laynka gurmada 800-642-5119
 - Codsadeyaasha u qalma waxaa ku jira qof kasta oo jira 60 sanno ama ka wayn aana awoodin inuu helo ama diyaarsado cuntooyinka muddo kooban ama si abadiyan ah sabab la xiriirta dhibaatooyin dhanka jirka, dhimirka ama garaadka ah.
- **Dadka reer Vermont ee jira 60 sano qabana xanuunnada muddada dheer ah ama naafada ah (Meals on Wheels):** booqo vcil.org/services/meals-on-wheels/ ama wac 802-224-1823.
 - Codsadeyaasha u qalma waxaa kamid ah dadka da'doodu ka yar tahay 60 sano ee qaba xanuunnada muddada dheer ah ama naafada ah
- **Barnaamijka Kabista Agabka Cuntada:** la xirii Vermont Foodbank 800-214-4648 ama booqo [CSFP - Vermont Foodbank \(vtfoodbank.org\)](#)
 - Dadka u qalma waa waayeelka ka wayn 60 sano ee ah heerka 130% ama ka hooseeya heerka dakhliga ee federaalka.
 - Da'da iyo dakhliga waxaa cadeynaaya qofka.

Gurmada Waxyeelada iyo Masiibada

Vermont waxa uu Madaxwayne Biden ugu dhawaaqay inay ku habsatay Masiibo Wayni, taasoo maalgelin federaal lagu siinayo dadka iyo xarumaha u qalma si looga caawiyo waxyeelooyinka gurmada u qalma ee ka dhacay deegaannada la ansixiyay. Hoos waxaad ka helayaa xog dheeraad ah oo ku aadan barnaamijyada lagu bixinaayo iclaamintaan xaalada

masiibada ah, iyo sidoo kale barnaamijyada federaalka iyo gobalka ee kaa caawinaaya waxyeelooyinka ka dhashay masiibadan.

Gurigayga ama agabka shaqsiga ah ayay waxyeelo gaartay, waa maxay caawimooyinka aan heli karo?

Hagaha Caymiska

Haddii aad caymis ka haysato caymiska mulkiileyaasha guryaha iyo/ama caymiska daadka, la xiriirida shirkadaada caymiska ayaa ah talaabo ay tahay inaad horey ka qaado. Waaxda maamulka Dhaqaalaha ayaa soo dhajisay xog kaa caawinaysa gudbinta sheegashooyinka caymiska. Xogtaas waxaa [laga heli karaa halkan](#).

Barnaamijka Caawimada Gaarka ah ee FEMA

Barnaamijka caawimada gaarka ah ayaa u sahlaya mulkiileyaasha guryaha, kireysteyaasha, iyo dadka kale (laakiin kuma jirana ganacsiyadu) ee ay saamayntu kasoo gaartay masiibada inay helaan magdhawga dhaqaale ee kharashaadka muhiimka ah iyo baahiyaha adag ee aysan dabooli karin shirkada caymisku ama noocy kale oo caawimo ah. Shaacinta waxaa hadda ku jira dadka ku nool ismaamullada Chittenden, Lamoille, Rutland, Washington, Windham, iyo Windsor laakiin ismaamullo kale ayaa hadda qiimayn lagu wadaa waxaana suuragal ah inay u qalmaan.

Warbixinnada, sheegashooyinka, iyo maal gelinnada FEMA

Kani waa nidaam ka soocan warbixinta 211 waayo codsiga waxaa toos loogu diraa FEMA. Codsiyada ayaa lasoo gudbin karaa isla marka ismaamulkaagu federaalku ugu dhawaaqo masiibada. Ku dhawaaqistaas ayaa dhacda marka FEMA ay hesho xog ku filan si ku dhawaaqistaasi loo sameeyo. Xogta hoose waa dulucdii oo kooban oo loogu talo galay tixraac ahaan kaliya. Si aad u gudbiso sheegasho aadna u hesho xog faahfaahsan booqo www.disasterassistance.gov ama wac 800-621-3362.

Kooxaha FEMA ayaa mari doonta dhammaan guryaha xaafadaha oo dhan. Waxay sidoo kale qiimaynayaan waxyeelada. Xubin kasta oo kamid ah kooxda FEMA ayaa lahaan doonta kaarka aqoonsiga oo ay FEMA siisay.

Noocyada caawimooyinka FEMA waxaa ku mid noqon kara:

- **Dayactirka iyo Badelida Guriga:** Caawimaada dhaqaalaha ee mulkiileyaasha guryaha si ay u dayactiraan, u badelaan, ama dib ugu dhisaan waxyeelada guriga soo gaarta ee aan caymisku daboolayn ee ka dhalata masiibada. Caawimaadan waxaa loogu talagalay in lagu dayactiro guriga si uu noqdo meel ammaan ah, nadiif ah, oo lagu noolaan karo.
 - Haddii guriga aad daganayd la go'aansho inuu yahay meel aan lagu noolaan karin kadib kormeerka FEMA.
 - Baahida guriga uusan daboolayn caymisku.
- **Kaalmada Kirada:** Caawimada dhaqaalaha si aad u kireysato guri ku meel gaar ah inta dayactirka waxyeelooyinka masiibadu sababtay lagu samaynaayo gurigaaga rasmiga ah, ama inta aad u guureyso guri rasmi ah.
 - Guriga aan lagu noolaan karin masiibada awgeed.
 - Qofka aqbala inuu meel kale u guuro.
 - Dadka baahiyahooda guriyaha uusan daboolin caymis.
- **Magdhawga Kharashka Albeerkada:** Kaalmada magdhawga dhaqaale ee kharashaadka mudada kooban ah ee albeerkada.
 - Guriga rasmiga ah ayaa burburay ama aan la dagi karin sabab la xiriirta waxyeelo wayn oo kasoo gaartay masiibada.
 - Ma jiraan xulashooyin kale oo guryo macquul ah oo si ku meel gaar ah loo dagi karo oo si fududna loogu kala socon karo sabab la xiriirta inaan la heli karin caawimo dhanka kirada ah.
- **Nadiifinta iyo Saarista:** Caawimada dhaqaale ee loogu talo galay adeegyada si wasaqda looga sifeeyo loogana dilo jeermiska aagaga guriga ee biyaha daadku saameeyeen.
- **Kharashaadka Guuritaanka iyo Kaydka:** Caawimada dhaqaale si aad si ku meel gaar ah ugu guurto una kaydsato agabka shaqsiga ah ee lagasoo bixiyay guriga waxyeeladu ku dhacday inta dayactir lagu samaynaayo. Caawimo

ayaa sidoo kale lagu heli karaa qaadista alaabaha guriga ee muhiimka ah ee la gaynaayo guriga cusub ee rasmiga ah.

- **Kharashaadka Caafimaadka iyo Ilkaha ee la Xiriira Masiibada:** booqo www.disasterassistance.gov ama wac 800-621-3362
- **Maal gelinnada kale ee kharashaadka la xiriira daadka:** booqo [si aad u aragto kharashaadka iyo baahiyaha daran ee kale ee ka dhashay masiibada ee dadka aan caymiska lahayn ama caymisku ku yar yahay.](#)

Waxyeelooyinka kale ee hantida shaqsiga ah

Haddii waxyeelo ama khasaaro soo gaaro hantidaada gaarka ah, gaariyaasha, ama agabka kale sawiro ka qaad, liis garee, oo hayso risiidyada badelidooda. FEMA ayaa ku siin *karta* maal gelin. Arag qaybta Caawimada Gaarka ah ee FEMA si aad u hesho xog dheeraad ah.

Waxyeelada biyaha iyo bulaacada

Haddii adeegyadaada biyaha iyo bulaacada ay waxyeelo gaartay adeeg bixiyahaaga maxaliga ah ayaa kaala shaqeyn doona soo celinta adeegga. Xog dheeri ah oo ku saabsan maareynta caqabadaha biyaha bulaacada ayaa hoos ku qoran.

- [Ogeysiisyada Kari oo Ha Cabin Biyaha](#)
- [Hagitaano ku aadan Nidaamyada Bulaacada Biyaha ee Nugul iyo kuwa Goobta kadib Daadka \(Guidance on Septic and Onsite Wastewater Systems after Flooding\)](#)
- [Daadka Kadib: Hagitaanada Biyaha la Cabo](#)

Hadda ma shaqeyo sababtoo ah waxyeelo soo gaartay cida aan u shaqeyo ama saamaynada kale ee daadka awgood, maxaan sameeyaa?

- **Caymiska shaqo la'aanta** – Haddii aad bilaa shaqo tahay sababtoo ah masiibada - tanoo ay ka mid tahay in aadan haysan shaqo ama meel aad ka shaqeyso; aadan tagi karin goobta shaqada; aadan shaqeyn karin sababtoo ah waxyeelo soo gaartay goobta shaqada; ama aadan shaqayn karin sababtoo ah dhaawac kaasoo gaaray masiibada – waxaad u qalmi kartaa gunnooyinka caymiska shaqo la'aanta. Ku soo gudbi oonlaynka laga bilaabo Arbacada, 19ka Luulyo adoo booqonaaya labor.vermont.gov/unemployment-insurance ama ka wac Xarunta Caawimada Codsadaha Caymiska Shaqo La'aanta 877-214-3330.
- **Caawimada Shaqo La'aanta ay Masiibadu keento** – Haddii aadan caadiyan u qalmin gunnooyinka caymiska shaqo la'aanta shaqadaadana ay saamayn kasoo gaartay masiibada, waxaad u qalmi kartaa Caawimada Shaqo La'aanta ay Masiibadu keento (DUA). Waaxda Shaqaalaha ayaa bixin doonta tilmaamo dheeri ah oo ku aadan DUA todobaadka Luulyo 17 shaqsiyaadka ayaana iska diiwaan gelin kara si ay u helaan xogihii ugu danbeeyay ee DUA barta <https://labor.vermont.gov/disaster-unemployment-assistance>.

Waxaan u baahan nahay in la iga caawiyo kharashaadka ama adeegyada kale saamaynta daadka awgeed, maxaan sameeyaa?

- **Laynka Gurmada Daryeelka Caruurta ee Vermont VT:** wac 800-649-2642
- **Kaalmada dhanka Tamarta ah:** wac 800-775-0516
- **Waxyeelada soo gaartay gaari muhiim ah:** booqo www.disasterassistance.gov ama wac 800-621-3362
- **Kharashaadka tacsida iyo aaska la xiriira masiibada:** booqo www.disasterassistance.gov ama wac 800-621-3362
- **Kharashaadka daryeelka carruurta ee la xiriira masiibada:** booqo www.disasterassistance.gov ama wac 800-621-3362
- **Caawimada Caafimaadka iyo Daawada:** booqo www.info.healthconnect.vermont.gov/find-local-help ama wac 855-899-9600
- **Laan Qeyrta Cas ee Mareykanka:** booqo www.redcross.org/local/me-nh-vt/get-help.html ama wac 855-891-7325

- **Kharashaadka Caafimaadka iyo Ilkaha ee la Xiriira Masiibada:** booqo www.disasterassistance.gov ama wac 800-621-3362

Ganacsigayga ama hay'adayda khayriga ah saamayn ayaa soo gaartay, waa maxay caawimooyinka aan heli karo?

Ganacsiyada iyo hay'adaha khayriga ah ayaan u qalmin barnaamijka Caawimada Shaqsiya ah ee FEMA laakiin waxaa jira caawimooyin dhaqaale oo la heli karo.

- **Waxyeelo Muuqata oo soo gaarta Ganacsiga:** Ganacsiyada iyo hay'adaha khayriga ah ee u qalma ayaa heli kara dayn dhan ilaa \$2 milyan. Booqo disasterloanassistance.sba.gov/ela/s/ ama wac 800-659-2955.
 - U qalmida: Ganacsi heer kasta ama ururada khayriga ah ee gaarka loo leeyahay intooda badan ee ku yaala aaga lagaga dhawaaqay inay masiibo ka jirto ayna waxyeelo ku dhacday intii masiibada lagu jiray
 - Khayraadka ayaa loo adeegsan karaa dayactirka ama badelida agabka dhismaha; mashiinnada; qalabka; waxyaabaha dhismaha; iyo hormarinta goobta kirada ah.
- **Caawimada Dhaqaale (aan ahayn mid muuqata) ee Waxyeellada:** Ganacsiyada yaryar ee u qalma, shirkadaha yaryar ee beeraha, iyo ururada khayriga ah ee gaarka loo leeyahay intooda badan ayaa heli kara taageero dheeri ah oo ku aadan waxyeelada aan ahayn mid alaabeed. Booqo disasterloanassistance.sba.gov/ela/s/ ama wac 800-659-2955.

Beertayda saamayn ayaa soo gaartay, waa maxay caawimooyinka aan heli karo?

Haddii waxyeelo soo gaartay beertaada waxaa jira qaabab dhawr ah oo aad ku helayso caawimo ayna ka mid tahay:

- **Caawimada Beerta La Xiriirta ee Wakaalada Beeraha ee VT:** Si aad u hesho xog dheeraad ah iimeel u dir agr.floodresponse@vermont.gov ama wac 802-828-5667.
- **Maalgelinta Xaalada Degdega ah ee Beereleeyda:** Wixii xog dheeraad ah booqo www.nofavt.org/farmer-emergency-fund ama wac 802-434-4122.
- **Ammaaho Degdega ah:** Si aad u hesho xog dheeraad ah booqo www.vtfarmfund.org/emergency-loan ama wac 802-560-3099.
 - Codsadeyaasha u qalma waa inay noqdaan beereleeyda Vermont ama cunto soo saareyaasha uu khasaare daran kasoo gaartay masiibo dabiici ah oo lama filaan ah taasoo khatar gelinaysa beertooda ama shaqadooda beeraha kuna dhacday dhismeyaasha; xayawaannada; qalabka; aqalka dhirta lagu beero (greenhouses); iyo xarumaha baadka xoolaha.
- **Caawimada Masiibada ee USDA:** booqo <https://www.fsa.usda.gov/programs-and-services/disaster-assistance-program/index> ama wac 855-794-3676. USDA ayaa daboosha waxyeelada soo gaarta xoolaha la dhaqdo; dhulka beerta; waxyeelada dhaqaalaha; iyo dalagga khasaara.

Waxaan ahay loo shaqeeye u baahan inuu cayriyo shaqaale daadka awgii; sidee ayaan ku xaqiijin karaa inay helaan gunnooyinka shaqo la'aanta ee ay u baahan yihiin?

Ma u baahan tahay inaad si ku meel gaar ah u xirto ganacsigaaga ama shaqada uga cayriso shaqaalahaaga? Halkan ayaad ka helayso sida loogu diyaarsho shaqaalahaaga shaqo la'aanta:

- Loo shaqeeyayaashu uma baahna inay la xiriiraan Waaxda Shaqaalaha marka ay shaqaalaha shaqada ka cayrinayaan.
- Kula tali shaqaalaha inay la xiriiraan Xarunta Codsiyada Caymiska Shaqo La'aanta ee Waaxda Shaqaalaha oo laga heli karo 877-214-3330 (Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo 8:30 galabnimo - 4:30 galabnimo) Waxaa intaas dheer, haddii shaqsiyaadku aysan awoodin inay Waaxda taleefan kula xiriiraan, waxay awoodi doonaan inay codsiga gunnooyinka caymiska shaqo la'aanta ku diraan oonlaynka laga bilaabo Arbacada, 19ka Luuliyo ayagoo booqanaaya <https://labor.vermont.gov>.
- Ma jiro baaritaanka shaqada oo looga baahan yahay shaqaalaha sida ku meel gaar ah shaqada loo cayriyay muddo 10 todobaad ah ama ka yar. Shaqsiyaadka gudbinaya codsiga gunnooyinka ayaa u baahan inay sheegaan qiyaas ahaan wakhtiga lagu laabanayo shaqada si looga dhaafto shardiga shaqo raadinta.

Sida loo Caawiyo

Ku Deeq

Marxaladaan waxaan ku talinaynaa in la bixiyo deeqo kaash ah. Booqo [Vermont Community Foundation \(Haayada Bulshada Vermont\)](#) ama [Vermont Disaster Recovery Fund \(Sanduuqa Kasoo kabashada Masiibada ee Vermont\)](#) si aad lacagta ugu deeqdo.

Dadka doonaaya inay ku deeqaan agabka cuntada ama shaqsiga ah waxaan ku talinaynaa inay la xiriiraan saraakiisha maxaliga ah iyo ururada khayriga ah ayna ku deeqaan keliya haddii baahi timaado ama la shaaciyaba.

Xog dheeraad ah iyo lifaaqyada ku saabsan deeqaha ayaa laga heli karaa [bogga Adeegyada Dhismaha iyo Kuwa Guud ee daadka](#) ama adigoo wacaya ama iimeel u diraya 802-828-1525 iyo donations@vermont.gov.

Ganacsiyada taageerada bixinaya: fadlan iimeel u dir Monica.Hutt@vermont.gov iyo Victoria.biondolillo@vermont.gov

Mutadawac

Mutadawiciin ayaa loo baahan yahay. Iska diiwaan geli www.vermont.gov/volunteer si kooxda SerVermont ay kuugu xiraan shaqooyinka bulshada ee ka socda Gobalka oo dhan.

Fursadaha kale ee mutadawacnimada waxaa ka mid ah:

- **Vermont Community Foundation:** wac 802-388-3355
- **Sanduuqa Gurmada iyo Kasoo kabashada Daadka ee VT:** booqo [Gurmada Daadka ee VT \(vermontcf.org\)](http://Gurmada Daadka ee VT (vermontcf.org))
- **United Way (waxaa jira waaxaha United Way oo ka shaqeeya xaafad kasta oo gobalka kamid ah):** booqo [United Ways in Vermont | United Way Worldwide](#)
- **Laan qeyrta Cas ee Mareykanka ee Gobalka Northern New England:** wac 800-464-6692 ama booqo [American Red Cross | Help Those Affected by Disasters](#)
- **Kaydka Cuntada ee Vermont:** wac 800-585-2265; ama booqo NoKidHungry.org
- **Maalgelinta Beeraha Vermont:** [Xarunta Dhaqaalaha Beeraha \(hardwickagriculture.org\)](http://Xarunta Dhaqaalaha Beeraha (hardwickagriculture.org))